# GOLAHA WAKIILADA JSL

## WAAXDA HADAL-QORAALKA IYO GUDIYADA

**Kal-fadhigii 37aad fadhigii 12aad**

**29/07/2018**

**Quraanka: -** Md Maxamuud Axmed Obsiiyey

**Gudoonka: -** Gudoomiye Md. Cali Aw Yuusuf Axmed

**Ajandaha Fadhiga:-**

- Ansixinya xeerka ka soo noqday Golaha Guurtida ee Xeerka Kufsiga iyo Xadgudubyada Jinsiga

**Gudoomiyaha: - Mudanayaal waxaynu ansixinaynaa Xeerka Kufista,** Waxa fadhiya 42 xuldhibaan markaa qodobka ugu horeeya ee ay wax ka bedelka Golaha Guurtidu ku samaysay xeerka xoghayntu ha akhrido:-

### Qodobka 1aad:
### Qeexid

**Waxay u dhignayd sidan:**

Haddii tuduca ay ku jiraan aanu micno kale siinayn, ereyada soo socda waxa ay yeelanayaan micnaha ku hor qoran:

**"Qasbid"** waxaa loola jeedaa cabsi gelin ama ku qasbid qof in uu galo ama ka qeyb qaato fal dambiyeed kufsi ama xad-gudub jinsi ah si ka soo horjeedda rabitaanka qofka kale tiiyoo loo isticmaalaayo xoog, cadaadis xagga maskaxda ama handadaad.

**"Dhibbane"** waxaa loola jeeda qofka dhaawac ama khasaare ay ka soo gaadhay fal dambiyeedka;

**Waxay u beddeleen sidan:**

### Qodobka 1aad:
### Qeexid

Haddii tuduca ay ku jiraan aanu micno kale siinayn, ereyada soo socda waxa ay yeelanayaan micnaha ku hor qoran:

***"Qasbid" waxaa loola jeedaa cabsi gelin ama ku qasbid qof in uu galo ama ka qeyb qaato fal dambiyeed kufsi ama xad-gudub jinsi ah, tiiyoo loo isticmaalaayo xoog, cadaadis xagga maskaxda ama handadaad.***

"**Dhibbane**" waxaa loola jeeda qofka dhaawac ama khasaare**uu** ka soo gaadhay fal dambiyeed **sida ku cad xeerkan**.

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 42

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 8

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen:26

Xidhibaanada Aaamusay: 7

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 1aad waxa loo raacayaa wax ka beddelkii ay sameeyeen Golaha Guurtidu.

## Qodobka 3aad:
## Ujeedooyuinka Xeerka

**Qodobka 3aad farqada 1aad waxay u dhignayd sidan:**

(1) In la dajiyo xeer waafaqsan ama la jaan qaadi kara dastuurka, minqiyaasyada caalami ee xaquuqaha aadamaha iyo mab; aadiida guud ee cadaaladda oo ku haboon waxna ka tari kara in la mamnuuco lagana hortago kufsiga iyo fal dambiyeedyada kale ee jinsiga

**Qodobka 3aad farqada 1aad waxa loo beddelay sidan:**

***(1) In la dajiyo xeer waafaqsan shareecada islaamka, dastuurka qaranka JSL, mabaadiida guud ee caddaalada, qiyamka iyo dhaqanka suuban ee umadu leedahay.***

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 42

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 3

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen:29

Xidhibaanada Aaamusay: 9

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 3aad farqada 1aad waxa loo raacayaa wax ka beddelkii ay sameeyeen Golaha Guurtidu.

## Qodobka 4aad:
## Kufsi

**Qodobka 4aad farqada 1aad xarfaha b,t iyo farqada 1aad waxay u dhignaayeen sidan:**

**(1)** Qof kasta oo

b) isticmaalaya **xoog**, **qasab** ama **hanjabaad** kula kaca galmo aan sharci ahayn qofkale oo aan ogoleyn raalina ka ahayn.

t) Kula kaca galmo aan sharcigu banayn qofkale oo aan awoodin bixinta raali ka ahaanshiyo waxa uu galay fal dambi kufsi, waxaana uu mutaysanayaa ciqaab xabsi ah oo u dhaxaysa shan iyo toban ilaa labaatan sannadood

**(2)** Ciqaabta la saarayo ama uu mutaysanayo eedeysanaha lagu eedeeyo faldambiyeed ku cad farqada koowaad ee qodobkan, waxay noqonaysaa ciqaab xabsi oo u dhaxaysa Labaatan ilaa Shan iyo Labaatan sannadood, haddii Dhibanaha fal dambiyeedku yahay qof carruura oo da' diisu tahay 15 jir ama ka yar;

**Qodobka 4aad farqada 1aad waxa la beddelay xarfaha b,t waxaan lagu daray j, Iyana waxa la beddelay farqada 1aad waxayna u dhigeen sidan:**

## Qodobka 4aad:
## Kufsi

1. Qof kasta oo

b) Isticmaalaya**xoog**, **qasab** ama **hanjabaad** kula kaca galmo aan sharci ahayn qofkale **oo ay kala jinsi yihiin waxa lagu ciqaabaya Shan sano ilaa labaatan sano (5-20)**
.

t) **Isticmaalaya xoog, qasab ama hanjabaad kula kaca galmo aan sharci ahayn qofkale oo ay isku jinsi yihiin waxa lagu ciqaabaya Shan iyo toban sano ilaa labaatan sano (15-20)**

j) Kula kaca galmo aan sharcigu banayn qofkale oo aan awoodin bixinta raali ka ahaanshiyo waxa uu galay fal dambi kufsi, waxaana uu mutaysanayaa ciqaab xabsi ah oo u **dhaxaysa toban ilaa labaatan sannadood (10-20)**

2. Ciqaabta la saarayo ama uu mutaysanayo eedeysanaha lagu eedeeyo faldambiyeed ku cad farqada koowaad, **xarfaheeda B iyo t,** waxay noqonaysaa ciqaab xabsi oo u dhaxaysa toban ilaa labaatan sannadood, haddii Dhibanaha fal dambiyeedku yahay qof carruura oo da' diisu tahay 15 jir ama ka yar;

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 42

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 24

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen:8

Xidhibaanada Aaamusay: 9

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 4aad waxa loo raacayaa sidii ay Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen.

## Qodobka 8aad
## Ku Xad-Gudub Jinsi

**Qodobka 8aad waxay u dhignayd sidan:**

Qofkasta oo ay ujeeddadiisu tahay kicinta ama qancinta dareenkiisa jinsi ama dareenka jinsi ee qof kale, si u la kac ah - u fara fareeya jidhka qofkaasi kale oon ogolayn falkaasi, ama qof kaas kale oo ah cid aan awoodin bixinta ogolaansho; ama ugu qasba qofkaa kale in uu isaga/iyada fara fareeyo; ama ugu qasba cidaa kale in ay is faro fareeyo Waxa uu galay fal dambi ah ku xad gudub jinsi, ,waxaana uu mutaysanyaa xadhig ciqaab u dhaxeeya hal ilaa saddex Sannadood.

(1) Ujeedada Qodobkan si loo dabaqo, Ereyga "faro farayn" ee waxa loola jeedaa in qof uu dhunkado, soo qabsado ama isku dhajiyo, ku tiiriyo ama isku xoqo , salaaxo ama tuu tuujiyo jidhka ama xubin ka mid ah jidhka qofka kale.

(2) Hadii faldambiyeedka Qodobkani dhigayo laga galo qof d'adiisu ka yar tahay 15 sanno jir ama qof naafo ah, dambiilaha waxa uu mutaysanyaa xadhig ciqaabeed u dhaxeeya saddex ilaa shan sannadood.

**Qodobka 8aad waxay u beddeleen farqad 1aad oo leh xarafaha B,T waxayna u dhigeen sidan:**

## Qodobka 8aad
## Ku Xad-Gudub Jinsi

1. Qofkasta oo ay ujeeddadiisu tahay kicinta ama qancinta dareenkiisa jinsi ama dareenka jinsi ee qof kale, si u la kac ah - u fara fareeya jidhka qofkaasi kale oon ogolayn falkaasi, ama qof kaas kale oo ah cid aan awoodin bixinta

ogolaansho; ama ugu qasba qofkaa kale in uu isaga/iyada fara fareeyo; ama ugu qasba cidaa kale in ay is faro fareeyo Waxa uu galay fal dambi ah ku xad gudub jinsi, ,waxaana uu mutaysanyaa xadhig ciqaab u dhaxeeya **hal ilaa saddex Sannadood.**

***b.*** Ujeedada Qodobkan si loo dabaqo, Ereyga "faro farayn" ee waxa loola jeedaa in qof uu dhunkado, soo qabsado ama isku dhajiyo, ku tiiriyo ama isku xoqo , salaaxo ama tuu tuujiyo jidhka ama xubin ka mid ah jidhka qofka kale.

t. Hadii faldambiyeedka Qodobkani dhigayo laga galo qof d'adiisu ka yar tahay 15 sanno jir ama qof naafo ah, dambiilaha waxa uu mutaysanyaa xadhig ciqaabeed u dhaxeeya **saddex ilaa shan sannadood.**

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 42

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 20

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 7

Xidhibaanada Aaamusay: 13

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 8aad waxa loo raacayaa sidii ay Golaha Wakiiladu u ansixiyeen.

## Qodobka 9aad
## Guur Qasab ah

**Qodobka 9aad waxa u dhignaa sidan:**

1. Qof kasta oo ku xadgudba shurruudaha sharci ee ogolaanshaha ama raali ka ahaanshaha aasaasiga u ah guurka ee ay dhigayaan Shareecada Islaamka iyo Xeerarka dalku ee si xoog ama qasab ah ugu guursada qof haween ah ama fududeeya, qaban qaabiya ama meel mariya guur isagoo aan xaqiijin ogolaanshaha mid ka mid ah ama dhamaan dhinacyada guurku khuseeyo sida ay dhigayaan shareecada islaamka iyo xeerarka dalka, waxa uu galay fal dambi Guur Qasab ah, waxaana uu mutaysanayaa xadhig ciqaabeed u dhaxeeya shan ilaa todoba sannadood.

2. Hadii cida cisha gashay faldambiyeedka ku xusan faqrada koowaad ee qodobkani uu adeegsaday xoog ama uu xoog ku maquuniyo wuxuu mutaysaysanaa xadhig ciqaabeed u dhexeeya todoba ilaa toban sano

**Qodobka 9^aad farqada 1^aad iyo 2^aad wax loo beddelay sidan:**

## Qodobka 9^aad
## Guur Qasab ah

1. Qof kasta oo ku xadgudba shurruudaha sharci ee ogolaanshaha ama raali ka ahaanshaha aasaasiga u ah guurka ee ay dhigayaan Shareecada Islaamka iyo Xeerarka dalkuee si xoog ama qasab ah ugu guursada qof haween ah ama fududeeya, qaban qaabiya ama meel mariya guur isagoo aan xaqiijin ogolaanshaha mid ka mid ah ama dhamaan dhinacyada guurku khuseeyo sida ay dhigayaanshareecada islaamka iyo xeerarka dalka, waxa uu galay fal dambi Guur Qasab ah, waxaana uu mutaysanayaa xadhig ciqaabeed u dhaxeeya shan ilaa todoba sannadood, ***Waxa ka reeban ciqaabta qodobkan abaaha iyo awoowga dhalay inanta ama inanka***

2. Hadii cida cisha gashay faldambiyeedka ku xusan faqrada koowaad ee qodobkani uu Adeegsaday xoog ama uu xoog ku maquuniyo wuxuu mutaysaysanaa xadhig ciqaabeed u dhexeeya **todoba ilaa toban sano**

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 42

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 24

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 4

Xidhibaanada Aaamusay: 13

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 9^aad waxa loo raacayaa sidii ay Golaha Wakiiladu u ansixiyeen.

## Qodobka 10^aad
## Ku tagri fal xil ama mas'uuliyad

**Qodobka 10^aad waxa u dhignaa sidan:**

(1) Qofka haya xil, mas'uuliyad ama meeqaam aamineed ee si ula kac ah u gala fal dambi kufsi ah oo ka dhan ah qof da'diisu tahay 15 sanno jir ama kayar, ama qof naafo ah waxa uu mutaysanayaa xadhig ciqaabeed u dhaxeeya Labaatan ilaa Shan iyo Labaatan Sannadood.

(2) Qofka haya xil, mas'uuliyad ama meeqaam aamineed ee kula kaca xadgudub jinsi qof da'diisu ka yar tahay 15 sanno jir, ama qof naafo ah waxa uu mutaysanayaa xadhig ciqaabeed u dhaxeeya shan ilaa todoba sannadood.

(3) Qofka haya xil ,mas'uuliyad ama meeqaam aamineed ee gala:

b) fal dambiyeedka uu dhigayo farqadda 1aad ee Qodobkan wax uu mutaysanayaa xadhig ciqaabeed u dhaxeeya todoba ilaa toban sannadood.

**Qodobka 10aad farqada 1aad iyo 2aad wax loo beddelay sidan:**

## Qodobka 10aad
## Ku tagri fal xil ama mas'uuliyad

***(1)*** Qofka haya xil, mas'uuliyad ama meeqaam aamineed ee si ula kac ah u gala fal dambi kufsi ah oo ka dhan ah qof da'diisu tahay 15 sanno jir ama kayar, ama qof naafo ah waxa uu mutaysanayaa xadhig ciqaabeed u dhaxeeya ***shan iyo toban ilaa Labaatan Sannadood.(15-20)***

(2) Qofka haya xil, mas'uuliyad ama meeqaam aamineed ee kula kaca xadgudub jinsi qof da'diisu ka ***wayn*** tahay 15 sanno jir, ama qof naafo ah waxa uu mutaysanayaa xadhig ciqaabeed u dhaxeeya ***Shan ilaa labaatan sannadood. (5-20)***

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 42

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 25

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 4

Xidhibaanada Aaamusay: 12

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 10aad waxa loo raacayaa sidii ay Golaha Wakiiladu u ansixiyeen.

## Qodobka 14aad:
## Isqaawin anshaxdarro ah

**Qodobka 14aad wuxuu u dhignaa sidan:**

Qofkasta oo si ula kac ah dadka dhexdiisa isugu qaawiya ama uga fayda marada xubnahiisa taranku waxa uu galay fal dambi isqaawin anshax darro, waxaana uu mutaysanayaa xadhig ciqaabeed u dhaxeeya 3 ilaa 6 bilood iyo ganaax lacageed oo u dhaxeeya 1,000,000 ilaa 2,000,000 oo shillinka Soomaaliland ah.

**Qodobka 14aad waxa u beddeleen sidan:**

## Qodobka 14aad
## Isqaawin anshaxdarro ah

Qofkasta oo si ula kac ah dadka dhexdiisa **ugu qaawiya** ama uga fayda marada xubnahiisa **taranka** waxa uu galay fal dambi **qaawin** anshax darro ah, waxaana uu mutaysanayaa xadhig ciqaabeed u dhaxeeya **1 sano ilaa 3 sano** iyo ganaax lacageed oo u dhaxeeya 1,000,000 ilaa **3,000,000** oo shillinka Soomaaliland ah.

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 42

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 25

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 4

Xidhibaanada Aaamusay: 12

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 14aad waxa loo raacayaa sidii ay Golaha Wakiiladu u ansixiyeen.

## Qodobka 17aad:
## Goorta gudbinta iyo bilawga dawcwadaha Galmo

**Qodobka 17aad waxa uu dhignaa sidan:**

**(1)** Majiro xilli u xaddidan
- b) Gudbinta dacwadda ama cabashada dhacdada fal dambiyeed jinsi, ama
- t) Billaabista oogista dacwad dhan ka ah la tuhunsane loo haysto fal-dambiyeed jinsi Xeerkan ku dhigan.

(2) Daahinta ama dib u dhaca gudbinta cabasho ama gudbinta warbixinta dacwadda fal dambi jinsi ka mid ah kuwa Xeerkan uu dhigayo looma adeegsan karo caddayn dhan ka ah cidda cabaneysa ama dhibbanaha

**Qodobka 17aad farqada 1aad waxa loo beddelay sidan:**

## Qodobka 17aad
## Goorta gudbinta iyo bilawga dacwadaha Galmo

***(1)*** ***Muddada bilowga dacwad waa 48sacaadood gudohood haddii aanay jirin sabab keentay dib u dhacaa.***
- b) Gudbinta dacwadda ama cabashada dhacdada fal dambiyeed jinsi, ama

t) Billaabista oogista dacwad dhan ka ah la tuhunsane loo haysto fal-dambiyeed jinsi Xeerkan ku dhigan.

(2) Daahinta ama dib u dhaca gudbinta cabasho ama gudbinta warbixinta dacwadda fal dambi jinsi ka mid ah kuwa Xeerkan uu dhigayo looma adeegsan karo caddayn dhan ka ah cidda cabaneysa ama dhibbanaha

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 42

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 27

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 3

Xidhibaanada Aaamusay: 11

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 17aad waxa loo raacayaa sidii ay Golaha Wakiiladu u ansixiyeen.

## Qodobka 38aad
## Ciqaabista Dambiileyaasha Wada jir Dambi u gala

**Qodobka 38aad waxa uu dhignaa sidan:**

Qof kasta oo haga, amra, dhiirigaliya, la taliya, abaabula, qasba, bilaaba, huriya, kala shaqeeya, gargaara ama qof kale ku caawiya inuu galo dambi ka dhan ah qodobada Xeerkan wuxuu muteysanayaa xukun ciqaabeed la mid ah ka uu mutaysto ama la saarao qofka dambiga galay (the principal offender).

**Qodobka 38aad waxa loo beddelay sidan:**

## Qodobka 38aad
## Ciqaabista Dambiileyaasha Wada jir Dambi u gala

Qof kasta oo haga, amra, dhiirigaliya, la taliya, abaabula, qasba, bilaaba, huriya, kala shaqeeya, gargaara ama qof kale ku caawiya inuu galo dambi ka dhan ah qodobada Xeerkan wuxuu muteysanayaa xukun ciqaabeedka ***ku haboon dembigaa inta uu ku leeyahay si waafaqsan xeerka ciqaabta guud.***

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 42

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 14

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 16

Xidhibaanada Aaamusay: 11

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 38aad waxa loo raacayaa wax ka beddelka ay sameeyeen Golaha Guurtida.

## Qodobka 39aad
## Amarka Magdhawga

**Qodobka 39aad wuxuu u dhignaa sidan:**

Maxkamada, kasekow xukun ciqaabeed ay xukunto, waxa kale oo u bannaan in ay dambiilaha si waafaqsan Xeerkan loogu caddeyey dambiilenimo ku xukunto inuu dhibanaha siiyo magdhaw ku filan asagoo ku siinaya waqti macquul ah. Amarka magdhawgu waxa uu noqon karaa:

- b) Qarashka daawada iyo daaweynta maskaxda ah;
- t) Qiimaha daaweynta jismiga iyo shaqada, iyo dib u habeynta;
- j) Qiimaha daryeelka cunugga markii uur uu kufsiga ka dhashay;
- x) Dhibanaha dakhligii ka lumay;
- kh) Qarashkii ku baxay qareenka iyo wixii kale kharash ah ee dhibanaha kaga baxay diyaarinta dacwadda iyo qeybgalka dhagaysiga dacwada oo ay ku jirto kharshaadka kaga baxay jiifka iyo safarka;
- d) magdhaw khuseeya Dhawaca iyo xanuunka dhanka niyadda ee soo gaadhay ; iyo
- r) khasaare lageed ee kale ee soo gaaray dhibanaha

**Qodobka 39aad wuxuu beddelay xarafka J, waxaanu lagu dary farqad 2aad oo dhigan sidan:**

## Qodobka 39aad
## Amarka Magdhawga

1) Maxkamada, kasekow xukun ciqaabeed ay xukunto, waxa kale oo u bannaan in ay dambiilaha si waafaqsan Xeerkan loogu caddeyey dambiilenimo ku xukunto inuu dhibanaha siiyo magdhaw ku filan asagoo ku siinaya waqti macquul ah. Amarka magdhawgu waxa uu noqon karaa:

- b) Qarashka daawada iyo daaweynta maskaxda ah;
- t) Qiimaha daaweynta jismiga iyo shaqada, iyo dib u habeynta;
- j) ***Qiimaha bikiro jebinta iyo meher u dhigma haweenka iyada la mid ka ah***
- x) Dhibanaha dakhligii ka lumay;
- Kh) Qarashkii ku baxay qareenka iyo wixii kale kharash ah ee dhibanaha kaga baxay diyaarinta dacwadda iyo qeybgalka dhagaysiga dacwada oo ay ku jirto kharshaadka kaga baxay jiifka iyo safarka;
- d) Magdhawkhuseeya Dhawaca iyo xanuunka dhanka niyadda ee soo gaadhay; iyo
- r) Khasaare lacageed ee kale ee soo gaaray dhibanaha

***2) Eedaysanaha hadii lagu waayo fal dembiyeedkaa lagusoo oogay waxa uu yeelanayaa magdhow waafaqsan shareecada islaamka iyo wixii khasaare kale ee soo gaadhay mudadi ay ku socotay dacwadu.***

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 42

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 2

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 25

Xidhibaanada Aaamusay: 14

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 39aad waxa loo raacayaa wax ka beddelka ay sameeyeen Golaha Guurtida.

## Qodobka 40aad

## Diiwaanka Dambiileyaasha Dambiyada Xadgudub Jinsiga

**Qodobka 40aad wuxuu u dhignaa sidan:**

(1) Xeerkani wuxuu abuurayaa Diwaanka Dambilayaasha Xadgudub Galmo Jinsi (Sex Offender Registry) oo la galin laguna ururin doona xadgudubyada jinsi ee si waafaqsan Xeerkan loogu xukumay xukun ciqaabeed ka badan 4 sannadood oo xadhig ah. Haddii dambiilaha la xukumay uu yahay mid loo xukumay fal dambiyeed xadgudub jinsi oo uu ka galay qof carruur ama naafo ahna, faahfaahinta dambilahaasi waa in la galiyo diiwaanka iyadoo lagu cadaynayo dhamaan falka iyo xadhig ciqaabeedka lagu xukumay.

(2) Diwaankan ku sheegay qodobka koowaad ee qodobkan waxaa ka masuul ah kaydintiisa iyo ilaalintiisaba Booliska Qaybta Dambi Baadhista (CID) waana in ay u samaysaa diwaankaa gaarka ah. Diwaankani la galin mayo eedaysanaha laakiin waxaa la galinayaa Dambiilaha uu dambigu maxkamad horteed kaga cadaado lana xukumo.

(3) Hay'adaha ay khusayso, sharci fulinta iyo hay'adaha dawliga ah ee gudanaya waajibaad qaran oo kaliya ayaa la tusi karaa Diiwaanka dambiilesaaha xadgudub Jinsi waxaana lagu soo saarayaa xeer nimaamiyo uu wasiirku soo saaro oo hagaya sida loo kaydinayo xogta iyo cida arki karta, adeegsigiisa iyo cida loo gudbin karo xogta diiwaanka ku qoran marka loo baahdo.

**Qodobka 40aad waxa lagu daray farqad 4aad :**

## Qodobka 40aad

## Diiwaanka Dambiileyaasha Dambiyada Xadgudub Jinsiga

(1) Xeerkani wuxuu abuurayaa Diwaanka Dambilayaasha Xadgudub Galmo Jinsi (Sex Offender Registry) oo la galin laguna ururin doona xadgudubyada jinsi ee si waafaqsan Xeerkan loogu xukumay xukun ciqaabeed ka badan 4 sannadood oo xadhig ah. Haddii dambiilaha la xukumay uu yahay mid loo xukumay fal dambiyeed xadgudub jinsi oo uu

ka galay qof carruur ama naafo ahna, faahfaahinta dambilahaasi waa in la galiyo diiwaanka iyadoo lagu cadaynayo dhamaan falka iyo xadhig ciqaabeedka lagu xukumay.

(2) Diwaankan ku sheegay qodobka koowaad ee qodobkan waxaa ka masuul ah kaydintiisa iyo ilaalintiisaba Booliska Qaybta Dambi Baadhista (CID) waana in ay u samaysaa diwaankaa gaarka ah. Diwaankani la galin mayo eedaysanaha laakiin waxaa la galinayaa Dambiilaha uu dambigu maxkamad horteed kaga cadaado Lana xukumo.

(3) Hay'adaha ay khusayso, sharci fulinta iyo hay'adaha dawliga ah ee gudanaya waajibaad qaran oo kaliya ayaa la tusi karaa Diiwaanka dambiilesaaha xadgudub Jinsi waxaana lagu soo saarayaa xeer nimaamiyo uu wasiirku soo saaro oo hagaya sida loo kaydinayo xogta iyo cida arki karta, adeegsigiisa iyo cida loo gudbin karo xogta diiwaanka ku qoran marka loo baahdo.

***(4) Diwaankan dambiilayaasha xadgudub yada fal jinsi looma adeegsan karo siyaasad.***

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 42

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 25

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 1

Xidhibaanada Aaamusay: 15

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 40aad waxa loo raacayaa sidii ay Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen.

## Qodobka 45aad:
## Burid ama Laalid

**Qodobka 45aad wuxuu u dhignaa sidan:**

(1) Waxaa la buriyay Qodobada 398, 399, 400 iyo 401 ee Xeerka Ciqaabeedka Guud.

(2) Xeer kasta ee kale ama qodobkasta oo sharci ama Xeer dhaqameed kasta oo ka soo horjeeda, ama aanan waafaqsanayn xeerkan waa la buriyay waxaana lagu baddalay qodobada Xeerkan.

(3) Qodobada Xeerka Ciqaabta Guud, Habka Xeerka Ciqaabta iyo Xeerarka kale ee ku haboon ee la jaan qaadi kara Qodobada iyo Ujeeddada Xeerkan waxa lagu dabaqayaa faldambiyeedyada uu Xeerkani xeerinayo.

**Qodobka 40$^{aad}$ waxa la beddelay farqada 2$^{aad}$**

## Qodobka 45$^{aad}$
## Burid ama Laalid

1. **Dhamaan ciqaabta kale ee ku jirta xeerkan waxa loo raacayaa si waafaqsan shareecada islaamka iyo xeerka ciqaabta guud, xadhiga xeerkani jidaynayaa Kama badnaan karo 20sano.**
2. **Xeer kasta oo kale ama qodobkasta oo sharci ama Xeer dhaqameed kasta oo ka soo horjeeda, ama aanan waafaqsanayn shareecada islaamka iyo xeerkan waa la buriyay si waafaqsan dastuurka qodobkiisa 130aad fiqadiisa 5aad.**
3. Qodobada Xeerka Ciqaabta Guud, Habka Xeerka Ciqaabta iyo Xeerarka kale ee ku haboon ee la jaan qaadi Kara Qodobada iyo Ujeeddada Xeerkan waxa lagu dabaqayaa faldambiyeedyada uu Xeerkani xeerinayo.

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 42

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 19

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 4

Xidhibaanada Aaamusay: 18

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 45$^{aad}$ farqada 2$^{aad}$ waxa loo raacayaa sidii ay Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen.

**Codka Guud ee la Ansixiyay Xeerka Kufsiga iyo Xadgudubyada Jinsiga**

| Foomka Codaynta | | | | |
|---|---|---|---|---|
| **No** | **Xildhibaanada Fadhiya** | **Ogol** | **Diidan** | **Aamusay** |
| | **43** | **42** | **0** | **0** |
| | | | | |
| | | | | |

**Guddoomiyuhu:** Ma Codayn

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**
**---------------------------------**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI**
**-----------------------------------**